

**MAGACAABO, BEDDELO, AMA JOOJIN WAKIIL SHARCIYEYSAN: URUR
(APPOINT, CHANGE, OR REMOVE AN AUTHORIZED REPRESENTATIVE: ORGANIZATION)**

Soo buuxi oo soo gudbi foomka Magacaabidda, Beddelaadda, ama Joojinta Wakiilka Sharciyeysan: Ururka, F-10126B, si aad u magacaabato, u beddesho, ama u Joojiso wakiilka sharciyeysan oo ah ururka ku metalaya. Si aad u beddesho qofka ururka lagala xiriirayo, adiga ama ururka waa in aad xafiiska nagala soo xiriirtaan. Macluumaadka aad xafiiska kula xariirayso ka eego barta internetka ee Wisconsin Department of Health Services (Waaxda Adeegyada Caafimaadka ee Wisconsin ama DHS) oo ah dhs.wi.gov/im-agency.

Si aad u Magacaabato **qofka**, ururka u shaqeeya ee kuu noqonaya wakiilka soo gudbi foomka [Qofka ee Magacaabidda, Beddelaadda, ama Joojinta Wakiilka Sharciyeysan, F-10126A](#), ama

Haddii aad leedahay masuul sharciyeysan oo ah hanti dhuleed, masuul ah qofka iyo hanti dhuleed, ama ilaaliye, qofkaasi waa in uu kuu magacaabo wakiil sharciyeysan haddii aad rabto qof kale oo aan qofkaas ahayn in uu kuu noqdo wakiil sharciyeysan. Haddii aad haysato caddeyn jirta oo ah in uu qof kuu matali karo si sharci ah, adiga iyo qofkaas ayaa magacaabi kara wakiil maaliyad oo sharciyeysan.

Masuulka sharciyeysan ee qofka ayaa u sii magacaabi kara wakiil keliya marka lagu soo magacaabo waraaqo maxakamadeed in qofku yahay ilaaliyaha sharciga ah oo waa in qofku yeelo qofka ku matalaya manaafacaadka uu xaq u leeyahay iyo barnaamijyada kaalmada dowladeed.

Wakiilka uga qareemaya daryeelka caafimaadka ma awoodi karo in uu metalaad ahaan u sii magacaabo wakiil kale.

Macluumaadka qofka lagu garan karo ee foomkaan lagu bixinayo waxaa loo isticmaali karaa kaliya maamulka tooska ah ee Wisconsin Medicaid, BadgerCare Plus, FoodShare, SeniorCare, Family Planning Only Services, iyo Caretaker Supplement.

Macluumaadka Wakiilka Sharciyeysan

Wakiilka sharciyeysan waa urur aqoon u leh xaaladahaaga guriga iyo nolosha oo aad ku aamineyso in ay magacaaga ku hadli karaan. Qof kasta ayaa kuu noqon kara **marka laga reebo** dadka soo socda:

- Dadka danbi ulakac ah oo ay sameeyeen awgiis looga saaray barnaamijka FoodShare kuuma noqon karaan wakiil sharciyeysan xilliga la ganaaxay ilaa aad weydo qof kale oo kuu noqon kara wakiil sharciyeysan.
- Dadka cuntada u geeya dad ay hayso hoy la'aan uma noqon karaan wakiil sharciyeysan dad ah hoy la'aan oo ay u geeyaan cunto. (Dadka hoy la'aanta ah waa dad gaaraya hal qof ama ka badan oo wada nool oo wada karsada cunto ay soo iibsadaan.)
- Shaqaalaha xafiiska ee go'aaminaya waxa aad xaq u leedahay ama qaadaneyso kuuma noqon karaan wakiilka sharciyeysan. Oggolaansho qoran oo gaar ah ayaa la siin karaa si ay xaalado gaar ah shaqaalahaasi u noqdaan wakiil sharciyeysan.
- Dukaamada wax looga soo ibsan karo kaarka FoodShare ma noqon karaan wakiil sharciyeysan, marka laga reebo xarumaha daaweynta Maandooriyaha iyo Aalkolada kuwooda la aqoonsan yahay.

Markaad magacaabato, wakiilkaaga sharciyeysan waxa uu adiga kugu matali karaa mid ka mid ah ama waxyaabaha soo socda oo dhan:

- Codsiga ama cusbooneysiinta manaafacaadka
- Soo-sheegidda wixii iska beddela macluumaadkaaga
- Xafiiska in uu kala shaqeeyo arrimaha la xiriira manaafacaadkaaga
- Soo-dirista cabasho iyo racfaan ku sabsan sida aad xaq ugu yeelaneyso barnaamijyada aad soo codsaneyso ama aad ku jirto.

Waxa kale oo aad kala dooran kartaa in uu wakiilka sharciyeysan helo koobbiga waraaqahaaga ku saabsan xaqu-yeelashada manaafacaadka.

Khasab **kuguma** aha in aad haysato wakiil sharciyeysan oo kuu soo codsada manaafacaadka. Si aad u soo codsato FoodShare adigoo ku jira xarun ah daaweynta maandooriyaha iyo aalkolada, wakiil sharciyeysan waa in uu magacaaga ku soo codsado.

Wakiilka ogolaanshaha u haysta ee aad foomkaan ku xusto ayaa kugu matali kara mid kasta oo kamid ah barnaamijyada soo socda: Wisconsin Medicaid, BadgerCare Plus, FoodShare, SeniorCare, Family Planning Only Services, iyo/ama Caretaker Supplement. Haddii aad ka diiwaangashantahay mid kamid ah barnaamijyadaan iyo Wisconsin Works (W-2), wakiilkaaga aad ogolaanshaha siisay ayaa sidoo kale kugu matali kara W-2.

Wakiilka sharciyeysan ee aad ku magacaabato foomkan **kuguma** matali karo Barnaamijka Wisconsin Shares Child Care Subsidy (Kabista Xannaannada Carruurta ee Wisconsin). Haddii aad codsaneyso Wisconsin Shares, waa in aad adigu soo codsato.

Tilmaamaha Foomka

Haddii foomkan laga waayo macluumaadka la iska rabo, sida mid ka mid ah saxiixyada, foomka waxaa loo tixgelinayaa inuusan dhammeystirneyn, oo wakiilka sharciyeysan **kuma** matali karo.

Qeybta 1 — Waa in aad soo buuxiso Qeybta 1. Waa in aad doorato haddii aad magacaabaneyso, beddeleyso, joojineyso wakiil sharciyeysan. Waxa kale oo lagaa rabaa magacaaga iyo taariikhda dhalashadaada si lagu aqoonsado. Haddii aad magacaabaneyso ama beddeleyso wakiil sharciyeysan, kala dooro haddii aad rabto in wakiilka sharciyeysan loo dirayo waraaqahaaga. Waxa xiga, waxyaabaha aad fahamtay. Haddii aad yeesho, saxiix foomka oo ku qor taariikhda.

Qeybta 2 — Qofka ku matalaya ee ururka u shaqeeya waa in uu soo buuxiyo Qeybta 2. Qofku waa in uu soo qoro magaca ururka iyo macluumaadka lagala soo xiriiri karo ee xafiiska iyo shakhsi ahaantiisa. Waxa kale oo qofka laga rabaa waxyaabaha uu fahmay iyo saxiixa iyo taariikhda foomka haddii uu ururka iyo qofka lala soo xiriirayo raalli ka yahay waxyaabaha qoran.

Qeybta 3 — Haddii aad magacaabaneyso ama beddeleyso wakiil sharciyeysan, waa in aad haysato qof kale oo xadir ah oo aan ahayn wakiilkaaga sharciyeysan marka aad foomkan saxiixayso. Qofkaas waxaa la yiraahdaa markhaati. Haddii aad foomkan ku saxiixayso "X," markaas waa in ay saxiixaaga arkayaan laba markhaati. Markhaatiga ama markhaatiyada waa in ay qoraan magacyadooda, saxiixa, iyo taariikhda ay foomka saxiixeen.

Gudbinta Foomka

Waxaad kusoo gudbin kartaa foomkaaga aad buuxisay mid kamid ah qaababkaan soosocda:



Intarnetka

Bog kasta oo foomka ah waa in aad ku soo dirto intarnetka ACCESS. Waxaad ka soo diri kartaa kadinkaaga ACCESS, oo aad ka heli karto access.wi.gov. (**Ogow:** Haddii aadan weli sameysan ACCESS, waa in aad iska soo diiwaan geliso access.wi.gov si aad u soo geli karto.)

Fiiro gaar ah: Waxaad kaliya ku iskaan garayn kartaa foomamka barta ACCESS xiliyo gaar ah. Haddii aadan awoodin inaad foomka ku iskaan garayso ACCESS, kudir foomka adoo adeegsanaaya mid kamid ah qaababka kale.



Fakiska

- Haddii aad ku nooshahay deegaanka **Milwaukee County**, foomka ku soo dir fakiska 888-409-1979.
- Haddii aadan **ku** nooleyn deegaanka Milwaukee County, foomka ku soo dir fakiska 855-293-1822.



Boostada

- Haddii aad ku nooshahay deegaanka **Milwaukee County**, foomka ku soo dir boostada:
MDPU
6055 N. 64th St.
Milwaukee, WI 53218
- Haddii aadan **ku** noolayn deegaanka Milwaukee County, foomka ku soo dir boostada:
CDPU
P.O. Box 5234
Janesville, WI 53547



Adigu Keenso

Adigu toos ugu gee xafiiska. Macluumaadka aad kula xariireyso ka eego barta intarnetka ee DHS dhs.wi.gov/im-agency.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan wakiilka sharciyeysan, booqo barta intarnetka ee DHS www.dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/representative-types.htm.

QAYBTA 1

Waa Inuu Buuxiyo Codsadaha/Qofka



Anigu waxaan:

- ☐ Magacaabanayaa wakiil sharciyeysan. Waxaa khasab ah in aad buuxiso **dhammaan** Qeybta 1.
- ☐ Beddelayaa wakiilka sharciyeysan. Waxaa khasab ah in aad buuxiso **dhammaan** Qeybta 1. Iska hubso in aad magaca wakiilka sharciyeysan ku qorto Dhinaca B.
- ☐ Joojinayaa wakiilka sharciyeysan. Waxaa khasab ah in aad buuxiso **Dhinacyada A iyo D** ee Qeybta 1. Waxba ha ku qorin Dhinaca B.

Dhinaca A: Macluumaadka Shakhsiga

Magaca — Codsadaha/Qofka (Awoowaha, Koowaad, Xarafka Aabbaha)

Taariikhda Dhalashada

Lambarka Kiiska (haddii aad leedahay)

Dhinaca B: Macluumaadka Oggolaanshaha

Waxaan ururka hoose u magacaabanayaa wakiilkeyga sharciyeysan:

Waxa kale oo aan rabaa in uu wakiilka sharciyeysan helo koobbiga waraaqahayga ku saabsan xaqu-yeelashada iyo manaafacaadka. Fadlan ogow in waraaqaha loo dirayo qofka lagala xiriirayo ururkaas.

- ☐ Haa
- ☐ Maya

Dhinaca C, Waxyaabaha aad Fahamtay.

Waxaan fahamsanahay oo yeelay:

- In aan xaq u leeyahay inaan doorto uruka aan rabo in ay ii noqdaan wakiilkeyga sharciyeysan.
- Anigaa markaan rabo beddelaya ama joojinaya wakiilkeyga sharciyeysan. Waxaa khasab ah in aan xafiiska ugu soo sheego si qoraal ah in aan iska beddelayo ama joojinayo wakiilkeyga sharciyeysan.
- Uma baahni in aan u sheego ururka in aan ka joojinayo in ay sii ahaadaan wakiilkeyga sharciyeysan.
- Wakiilka sharciyeysan ee ku qoran foomkan ayaa ii noqonaya wakiilkeyga sharciyeysan ilaa aan anigu beddelayo ama joojiyo.
- Wakiilka sharciyeysan ee xarunta daaweynta Maandooriyaha iyo Aalkolada waa lagaa joojinayaa marka lagaa soo saaro. In aad soo gudbisno waraaqdan aad ku joojineyso oggolaanshaha khasab kuguma aha.
- Wakiilkeyga sharciyeysan wuxuu heli karaa macluumaadkeyga shakhsiga ah, sida Sagaalkeya Lambar, waraaqahayga bangiga, iyo macluumaadka caafimaadkeyga si uu ugu maareeyo xaqu-yeelashadeyda.
- Waa khasab igu ah in aan wakiilka sharciyeysan siiyo macluumaad run iyo sax ah.
- Aniga ayaa ka masuul ah macluumaadka khaldan ee aan saxa ahayn ee uu wakiilkeyga sharciyeysan soo gudbiyo. Waxaan fahamsanahay haddii aniga ama wakiilkeyga sharciyeysan nala ka helo macluumaad been ah ama aan macluumaad sheegi weyno, markaas:
 - Aniga ayaa soo celinaya manaafacaadkii aanan xaq u lahayn.

- Anigaa ayaa la i ganaaxayaa.
 - Barnaamijka ayaa la iga mamnuucayaa.
 - Maxkamad ayaa la igu saari karaa khiyaamada.
- Markaan foomkan saxiixo, waxaan caddeynayaa in aan fahmay oo yeelay wayaabaha kor ku qoran.

Dhinaca D: Saxiixa iyo Taariikhda	
 SAXIIXA— Codsadaha/Qofka	Taariikhda Saxiixa

QAYBTA 2

Waa Inuu Buuxiyo Wakiilka Sharciyeysan



Dhinaca A: Sida Loola Xiriirayo

Magaca — Ururka

Cinwaanka Xafiiska

Magaalada	Gobolka	Lambarka Boostada	Lambarka Taleefanka (ku dar furaha)
-----------	---------	-------------------	-------------------------------------

Magaca — Qofka Ururka (Awoowaha, Koowaad, Xarafka Aabbaha)

Xilka Shaqada — Qofka Ururka	Cinwaanka Boostada Internetka (Email) — Qofka Ururka (haddii aad rabto)
------------------------------	---

Dhinaca B: Waxa aad Fahamtay

Waxaan fahamsanahay oo yeelay in:

- Anigu aan ahay wakiilka ku hadlaya magaca ururka ku qoran Qeybta 2, Dhinaca A.
- Markaan ahay wakiilka sharciyeysan, ururku wuxuu ku xadeysan yahay in uu codsadaha magaciisa ugu sameyn karo waxyaabaha soo socda:
 - Codsii ama cusbooneysiin ah manaafacaadka
 - Soo-sheegidda wixii is beddela
 - Codsadaha in aan kala shaqeeyo arrimiisa xafiiska wixii la xiriira arrimaha manaafacaadka.
 - Soo-dirista cabashooyinka iyo racfaanka wixii la xiriira xaqu-yeelashada.
- Ururka waxaa laga filayaa in ay aqoon u leeyihiin xaaladaha codsadaha ama qorka.
- Ururku waa in uu xafiiska u soo sheego wixii iska beddela qofka lala soo xiriirayo ee ku qoran Qeybta 2. Dhinaca A
- Codsadaha ama qofka ayaa wakhtigii uu rabo ka joojin kara ururku in uu u sii ahaado wakiil sharciyeysan.
- Codsadaha ama qofku uma baahna in uu ururka ogeysiyo in uu ka joojiyey in ay u noqdaan wakiilka sharciyeysan.
- Ururka ayaa ah wakiilka sharciyeysan ee codsadaha ama qofka ilaa uu codsado wakiil kale oo sharciyeysan ama qofka ayaa sheegan kara in uusan rabin wakiil sharciyeysan.
- Ururka iyo qof kasta oo ku hadlaya magaca qof ay matalayaan waa in laga helo macluumaad run iyo sax ah.
- Haddii ururku soo sheego macluumaad been ah ama aan sax ahayn, codsadaha ama qofka waa in uu soo celiyo wixii lagu siiyey si khalad ah.
- Haddii ay ururku si ulakac ah khalad ugu sameeyaan sharciyada barnaamijka, waa inay soo celiyaan FoodShare wixii khalad loo bixiyey.
- Ururka iyo qofka ku matalaya waxaa khasab ku ah in ay u hoggaansamaan sharciyada gobolka iyo kuwa federaalka, sida 42 C.F.R. Qeybta 431, Farqadda F; 42 C.F.R. § 447.10; 45 C.F.R. § 155.260(f); iyo 7 CFR 273.2(n)(4), wixii noqon kara dano iska horimaanaya iyo xogdhowrida macluumaadka.

- Markaan foomkan saxiixo, waxaa caddeynayaa in aan fahmay oo yeelay wayaabaha matalaadda kor ku qoran ee ururka ku qoran Qeybta 2, Dhinaca A.
- Markaan foomka saxiixo, waxaan caddeynayaa in ururka ku qoran Qeybta 2, Dhinaca A ay ii noqon doonaan wakiilka sharciyeysan ee codsadaha ama qofka ku qoran Qeybta 1.

Dhinaca C: Saxiixa iyo Taariikhda.	
 SAXIIXA — Xiriirka Ururka	Taariikhda Lasaxiixay

QAYBTA 3

Waa Inay Buuxiyaan Markhaati(yada)

Magaca – Markhaatiga (Awoowaha, Koowaad, Xarfaha Aabbaha)	
 SAXIIXA — Markhaatiga	Taariikhda Lasaxiixay
Magaca — Markhaatiga (Awoowaha, Koowaad, Xarafka Aabbaha) (haddii codsadaha/qofku ku saxiixo X)	
 SAXIIXA — Markhaatiga	Taariikhda Lasaxiixay

Hay'adaha gobalka ama deegaanka ee Barnaamijka Kaalmada Nafaqada ee Dheeraadka ah (SNAP) iyo Barnaamijka Cunta Qeybinta ee Indian Reservation (FDPIR), iyo hay'adaha la hawlgala, waa inay soo dhajiyaan Bayaanka Takoor La'aanta ee soo socda:

Sida waafaqsan sharciga xuquuqaha madaniga ah ee federaalka iyo sharciyada iyo qaynuunada xuquuqaha madaniga ah ee Waaxda Beeraha ee Mareykanka (USDA), hay'adan waxaa ka mamnuuc ah takoorida ku salysan isirka, midabka, asalka qaran, jinsiga, (oo ay ku jiraan, aqoonsiga jinsiga iyo nooca jinsiga), caqiidada diimeed, naafonimada, da'da, aaminsanaanta siyaasadeed, ama aargoosiga ama aargudashada hawlo hore oo xuquuqaha madaniga ah.

Macluumaadka barnaamijka waxaa lagu heli karaa luuqado aan ahayn Ingiriisiga. Shaqsiyaadka naafada ah ee u baahan qaab kale oo wada xidhiidh si ay u helaan macluumaadka barnaamijka (tusaale, Hab qoraaleedka camoolaha, daabicidda farta waaweyn, cajalada maqalka, Luuqadda Dhagoolka ee Maraykanka), waa inay la xidhiidhaan hay'adda (gobalka ama deegaanka) ee ay dheefaha ka codsadeen. Shakhsiyaadka dhagaha la', maqalka ku adag yahay ama hadalka naafo ka ah ayaa la xidhiidhi kara USDA iyaga oo u maraya Federal Relay Service (Adeegga Dadka Dhagaha la' ee Federaalka) ee lambarka (800) 877-8339.

Si loo gudbiyo dacwada takoorka ee barnaamijka, Dacwad-qabaha waa inuu buuxiyo Foomka AD-3027, Foomka Dacwada Takoorka Barnaamijka ee USDA kaas oo onleen ahaan looga heli karo barta: <https://www.fns.usda.gov/sites/default/files/resource-files/ad3027-somali.pdf>, xafiis kasta oo USDA ay leedahay, iyada oo la wacayo (833) 620-1071, ama la qorayo warqad ku socota USDA. Warqadda waa inay leedahay magaca, ciwaanka, lambarka taleefanka ee dacwad-qabaha, iyo sharraxaad qoraal ah oo ku saabsan falka takoorka ah ee la soo eedeeyay oo faahfaahsan si loogu wargaliyo Kaaliyaha Xoghayaha ee Xuquuqaha Madaniga (ASCR) nooca iyo taariikhda xadgudubka xuquuqda madaniga ah ee la soo eedeeyay. Foomka AD-3027 ee la buuxiyay ama warqadda waa in lagu diraa;

- (1) **boostada:**
Food and Nutrition Service, USDA
1320 Braddock Place, Room 334
Alexandria, VA 22314; ama
- (2) **fakiska:**
(833)-256-1665 ama (202)-690-7442; ama
- (3) **iimaylka:**
FNSCIVILRIGHTSCOMPLAINTS@usda.gov

Hay'addan waa hay'ad bixisa fursad loo wada siman yahay.

Nondiscrimination Notice: Discrimination is Against the Law – Health Care-Related Programs

Wisconsin Department of Health Services waxay u hogaansantaa sharciyada xaquuqaha rayidka Faderaalka la heli karo oo kuma takooro si ku saleysan jinsiyada, midibka, asalka dhalashada, da'da, curyaanimada, ama jinsiga. Department of Health Services kama reebto dadka ama ulama dhaqanto si ka duwan sababtoo ah jinsiyadooda, midibka, asalka dhalashada, da'da, curyaanimada, ama jinsiga.

Department of Health Services:

- Waxay siiyaan dadka gargaaro iyo adeegyo bilaash ah dadka curyaanka ah si ay si ku fillan noola xiriiraan, sida:
 - Turjubaanada luuqada aastaanta u qalmo.
 - Warbixin qoran ee qaabab kale (daabacid weyn, dhageysiga, qaababka korantada la heli karo, qaababka kale).
- Siisaa adeegyada luuqada oo bilaash ah dadka luuqadooda koowaad aanan Ingiriis aheyn, sida:
 - Turjubaano u qalmo.
 - Warbixinta lagu qoray luuqadaha kale.

Haddii aad u baahantahay adeegyadaan, la soo xiriir Department of Health Services civil rights coordinator (844-201-6870).

Haddii aad aaminsantahay in Department of Health Services ay ku guuldareysatay inay bixiso adeegyadaan ama kugu takooratay qaab kale ee ku saleysan jinsiyada, midibka, asalka dhalashada, da'da, curyaanimada, ama jinsiga, waxaad ku xareyn kartaa cabasho: Department of Health Services, Attn: Civil Rights Coordinator, 1 West Wilson Street, Room 651, PO Box 7850, Madison, WI 53707-7850, 844-201-6870, TTY: 711, fax: 608-267-1434, dhscrc@dhs.wisconsin.gov. Waxaad ku soo xareyn kartaa cabasho qof ahaan ama i-meel ahaan, fakis, ama i-meel. Haddii aad u baahantahay caawinta xareynta cabashada, Department of Health Services civil rights coordinator ayaa diyaar kuu ah inuu ku caawiyo.

Waxaad sidoo kale ku xareyn kartaa cabashada U.S. Department of Health and Human Services, Office for Civil Rights, koronta ahaan oo dhinaca Office for Civil Rights Complaint Portal (Xafiiska Bogga Cabashada Xaquuqda Rayidka), waxaa laga heli karaa <https://ocrportal.hhs.gov/ocr/portal/lobby.jsf>, ama boosto ahaan ama taleefonka:

U.S. Department of Health and Human Services
200 Independence Avenue, SW
Room 509F, HHH Building
Washington, D.C. 20201
800-368-1019, 800-537-7697 (TDD)

Foomamka cabashada waxaa laga heli karaa <http://www.hhs.gov/ocr/office/file/index.html>.

Español (Spanish) ATENCIÓN: si habla español, tiene a su disposición servicios gratuitos de asistencia lingüística. Llame al 844-201-6870 (TTY: 711).	Deutsch (Pennsylvania Dutch) Wann du Deutsch (Pennsylvania Dutch) schwetzscht, kannst du ebber grieghe as dich helfe kann mit Englisch, unni as es dich ennich eppes koschte zellt. Ruf 844-201-6870 uff (TTY: 711).
Hmoob (Hmong) LUS CEEV: Yog tias koj hais lus Hmoob, cov kev pab txog lus, muaj kev pab dawb rau koj. Hu rau 844-201-6870 (TTY: 711).	ພາສາລາວ (Laotian) ເຊິນຊາບ: ຖ້າທ່ານເວົ້າພາສາລາວ ແມ່ນມີບໍລິການຊ່ວຍເຫຼືອດ້ານພາສາ ບໍ່ເສຍຄ່າໃຫ້ທ່ານ. ໃຫ້ໂທຫາເບີ 844-201-6870 (TTY: 711).
繁體中文 (Traditional Chinese) 注意：如果您使用繁體中文，您可以免費獲得語言援助服務。請致電 844-201-6870 (TTY: 711)。	Français (French) ATTENTION : Si vous parlez français, des services d'aide linguistique vous sont proposés gratuitement. Appelez le 844-201-6870 (ATS : 711).
Deutsch (German) ACHTUNG: Wenn Sie Deutsch sprechen, stehen Ihnen kostenlos sprachliche Hilfsdienstleistungen zur Verfügung. Rufnummer: 844-201-6870 (TTY: 711).	Polski (Polish) UWAGA: Jeżeli mówisz po polsku, możesz skorzystać z bezpłatnej pomocy językowej. Zadzwoń pod numer 844-201-6870 (TTY: 711).
العربية (Arabic) ملحوظة: إذا كنت تتحدث العربية، فإن خدمات المساعدة اللغوية تتوافر لك بالمجان. اتصل برقم 844-201-6870 (رقم هاتف الصم والبكم: 711).	हिंदी (Hindi) ध्यान दें: यदि आप हिंदी बोलते हैं तो आपके लिए मुफ्त में भाषा सहायता सेवाएं उपलब्ध हैं। 844-201-6870 (TTY: 711) पर कॉल करें।
Русский (Russian) ВНИМАНИЕ: Если вы говорите на русском языке, то вам доступны бесплатные услуги перевода. Звоните 844-201-6870 (телетайп: 711).	Shqip (Albanian) KUJDES: Nëse flisni shqip, për ju ka në dispozicion shërbime të asistencës gjuhësore, pa pagesë. Telefononi në 844-201-6870 (TTY: 711).
한국어 (Korean) 알림: 한국어 지원 서비스를 무료로 이용하실 수 있습니다. 844-201-6870 (TTY: 711) 번으로 전화해 주십시오.	Tagalog (Tagalog – Filipino) PAUNAWA: Kung nagsasalita ka ng Tagalog, maaari kang gumamit ng mga serbisyo ng tulong sa wika nang walang bayad. Tumawag sa 844-201-6870 (TTY: 711).
Tiếng Việt (Vietnamese) CHÚ Ý: Nếu bạn nói Tiếng Việt, có các dịch vụ hỗ trợ ngôn ngữ miễn phí dành cho bạn. Gọi số 844-201-6870 (TTY: 711).	Soomaali (Somali) FIIRO GAAR AH: Haddii aad ku hadashid af Soomaali, adeegyada caawinta luuqada, oo bilaash ah, ayaa lagu heli karaa. Soo wac 844-201-6870 (TTY: 711).